

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Malafkaaga bukaan socodka iyo macluumaadkaaga khaaska ah

Warbixinta ku taala malafkaaga bukaan socodka waa loo baahan yahey si laguugu daaweeyo si haboon oo badbaadsan. Kuwaas waxa kale oo loogu baahan yahey hubinta tayada, aminga bukaan socodka iyo maamulida la socodka. Warbixinta ku jirta malafkaaga bukaan socodka waxa ka mid ah baadhitaanka iyo daaweynta, waxaad cudur laheyd, iyo warbixinta in hadii lagu dhigey cosbitaal.

Malafka isku xidhan

Hadaanu nahey shaqaalaha caafimaadka waxaanu adeegsanaa habka malfyada isku xidhan. Taas waxa weeye micnaheedu in shaqaalaha, meesha aad ka dalbaneyso daryeelka caafimaadka, ay haystaan awooda ay kaga heli karaan malafkaaga meelaha kale ee bixiya daryeelka caafimaadka – gudiga degmada, dawlada hoose iyo bixiyayaasha rugaha daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leeyahey. Ujeeda tani waa si loo sahlo in aragti dhameystiran laga helo taariikhda daawadaada iyo baaahiyaha daryeelka caafimaadkaaga.

Kaliya shaqaalaha kula leh xidhiidhka shaqaalaha/bukaan socodka ayaa awood u leh inay furaan malafkaaga si laguugu daaweeyo si haboon oo badbaadsan. Taasi waxay khuseysaa dhamaan gudiga degmada, dawlada hoose iyo bixiyayaasha rugaha daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leeyahey. Shaqaalaha caafimaadka ee bixiyayaasha daryeelka caafimaadku ma akhriyi karaan malafkaaga iyagoon ogolaansho hore haysan.

Waxaad xaq u leedahey inaad ku jirin habka malafka isku xidhan.

Fursada lagu xakameynaayo warbixinta

Waxaad xakameyn kartaa warbixinta aanad rabin in la siiyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka. Waxaad dalban kartaa in xakameynta laga qaado markasta. Xeerer gaar ah ayaa khuseeya carruurta iyo da'yarta. Hadii aad tahey daryeele ma lihid xuquuqda aad ku xakameynayso warbixinta malafka ilmaha. Hadii aad tahey qof ka yar 18 jir adiga ayaa xakamey kara warbixinta malafkaaga, iyadoo loo eegaayo koritaanka da'daada iyo masuulnimadaada.

Ayaa akhriyey malafkayga?

Kaliya shaqaalaha kula leh xidhiidhka shaqaalaha/bukaan socodka ayaa awood u leh inay furan warbixinta malafkaaga. Dhamaan shaqaalaha caafimaadka waxa ku qasab ah inay raacaan xeerka sir haynta iyadoo warbixintana laga ilaaliyo inay cid aan awood u lahayni eegto. Cida eegtey warbixintaada waa la raadraaci karaa, adiguna waxaad xaq u leedahay inaad ogaato cida ay tahey. Golaha deeganku waxa uu sameeyaa baadhitaano habaysan oon

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

la kala dooran soona noqnoqda oo diiwaanka malafka ah. La xidhiidh Sarkaalaka Ilaalinta Macluumaadkaaga hadii aad rabto inaad hesho liisto diiwaanka malafkaaga ah.

Hadii ay jiraan wax ka mid ah malafkaaga oo aanad fahmin waxaad waydiin kartaa shaqaalahaaga daaweynta inay kuu sharaxaan. Hadii aad filayo in warixintu ay tahey midaan sax aheyn taas waxa lagu dari doonaa malafka.

Nuqul malafkaaga ah

Hadii aad rabto inaad hesho nuqul malafkaaga ah waxa taa lagu sameyn iyadoo waxoogaa kharash ay lagaa qaadaayo. Hadii ay fikrada dhakhtarkaagu tahey inaan lagu siin malafkaaga waxaad go'aankan rafcaan kaga qaadan kartaa adigoo warqad u soo qoraaya maxkamada racfanka ee maamulka ee Jönköping. Hadii aad doonayso in malafkaaga la baa'biyo waxaad taas ka dalban kartaa Gudiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka ee Malmö.

Macluumaadkaaga khaaska ah

Sida ku dhigan Sharciga Ilaalinta Arimaha khaaska ah (PuL) waxaad xaq u leedahay, sanadiiba hal mar iyadoo lacag la'aan ah wax kasta oo warbixin khaas ah oo ay Golaha Deegaanku kaa qoreen adiga. Gudiga Golaha Deegaanku ayaa ka masuul ah warbixintan. Dalabkaagu waa inuu ahaado qoraal uu saxeexaagu ku yaalo. Ku soo hagaaji tan Sarkaalka Ilaalinta Macluumaadka. Hadii aad ka hesho wax qalad ah warbixintaada waxaad ka dalban kartaa Golaha deegaanka inay saxaan taas.

Su'aalaha

Hadii aad hayso wax su'aalo ah oo ku sabsan xeerka macluumaadka bukaan socodka waxaad la soo xidhiidhi kartaa lataliye daawenta ah.

Hadii aad hayso wax su'aalo ah oo ku sabsan warbixinta arimaha gaarka ah waxaad la soo xidhiidhi kartaa sarkaalka ilaalinta macluumaadka. Soo wac isku gudbiyaha Golaha Deegaanka ee 0470 58 80 00.

Warbixin dheeraad ah waxaad ka helaya 1177.se/kronoberg iyo qolkayaga sugida.